



CRS waxay siisaa bulshooyinka afar adeeg oo gaar ah ▼

Fududeynta Wadahadalka

CRS waxay fududeysaa wadahadalka u dhaxeeya bulshada qeybaheeda si loo furo xiriirka u dhaxeeya dhinacyada

Dhexdhexaadin

CRS waxay bixisaa adeegyo dhexdhexaadin ah si bulshada uga caawiso xalinta iskudhaca iyo xiisadaha si fool ka fool ah dhinacyada uga garrootamaan

Tababar

Barnaamijka tababarka CRS waxuu isku keena wakiillo ka socda gobolka iyo hay'adaha dowladda deganka, ururrada diinta, nabad sugidda, kooxaha dadka u dooda, iyo kooxo kale si loo horumariyo fahan guud loona caddeeyo siyaabaha laysku kaashado ee loo yareeyo iskudhaca bulshada

Consultation

CRS waxa bixisaa adeegyo la-talin ah si loo caawiyo in bulshooyinka ay si waxtar leh uga iawaabaan isku-dhaca

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS)

La Shaqeynta Bulshooyinka

Musiibada Saameysay

CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” ayadoo fududeynaysa fahanka iyo wanaajinta xiriirka dadka soo foodsaartay isku-dhac, iyo awoodda bulshada si gooni ah uga hortagto oona xalliso iskudhaca mustaqbalka.

Waxaa lagu aasaasay Sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waxay ka jawaabtaa iskudhac bulshada ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. CRS ma laha awood sharci hirgelin ama maxkamadeyn. Laakiin, CRS waxay la shaqeysaa bulshooyinka iskudhacay inay dibu dhisaan xiriirka, fududeysaa is wada fahanka, ayna dhiirri gelisaa xal degaanka ah.

Heshiiyayaasha CRS waxay si toos ah ula shaqeeyaan saraakiisha gobolka iyo deegaanka, ururrada bulshada, kuwa u dooda bulshada iyo xuquuqda rayidka, kooxaha diinta, iyo nabad sugidda si tabarruc ah ee lacag la'aan ah. CRS waxay u shaqeysaa si dhexdhexaad ah, adeegyadeedana waa kuwa lacag la'aan ah ee xafidan.

Kiis Tusaale Fiican ▼

In kastoo laga rabin inay u gurmato musiibooyinka dabiiciga ah, CRS waxay la shaqeysaa bulshooyinka siyaabo kala duwan u waxyeelloobay. Kadib dufaantii 2017 ee sababtay qasaaro taariikhi ah, CRS waxaa loo doortay inay FEMA ka caawiso dadaalada mucaawinada musiibada hay'adaha kawada shaqeeyaan.

Natalia Casella, ka shaqeysa Barnaamij CRS da, waxay shaqo la 'aaday Koox gurmada ah FEMA si u caawiso dadka ka badbaaday Duufaanta Irma in deegaanka Glades ee Koonfurta Florida. Ayadoo ah Khabiir Arrimaha Dowliga ah, waxay isku dubaridday dadaalada mucaawinada iyo kasoo kabsiga Duufaanta Irma. Jagadan waxay la shaqeysaa dowladaha gobolka iyo deegaanka si toos ah adeeg loogu diro meelaha waxyeelloobay ee saraakiisha deegaanka cayimeen. Natalia waxay awoodday inay isticmaasho khibradeeda la xiriirka bulshada iyo fududeynta si ay uga caawiso dadka ku howlan dadaalka kasoo kabashada si loo bixiyo mucaawino aad loogu baahan yahay.



Sawirka waxaa qaaday Wasaaradda Cadaaladda/Natalia Casella

Wixii macluumaad dheeri ah ee adeegyada CRS, fadlan naga soo wac 202-305-2935, email noo soo dir ▼ askcrs@usdoj.gov ama naga soo booqo bogga internet ka : www.justice.gov/crs.

facebook.com/DOJCRS/

@DOJ_CRS